

Ridgeview

Xeerka Taageerada Maaliyadeed – Soo Koobitaanka Luuqada Fudud

Xeerka/Barnaamijka Taageerada Maaliyadeed (Financial Assistance Policy/Program, FAP) ee Ridgeview ayaa jira si loo siiyo bukaanada u qalma daryeelka caafimaad ee degdegga ah ama mid lagama maarmaanka ah – si buuxda ama qayb ahaan qiimaha la dhimay. Bukaannada doonaaya Taageerada Maaliyadeed waa inay codsadaan barnaamijka, kaasoo hoos lagu soo koobay.

Adeegyada u Qalmitaanka – Adeegyada xaalada degdega ah iyo/ama kuwa caafimaad ahaan muhiimka ah ee ay bixisay Ridgeview, iyo dhamaan xarumaha caafimaadka ee ay leedahay Ridgeview. Adeegyadu waxay khuseeyaan kaliya adeegyada kharashkoodu ay soo dalacdo Ridgeview. Adeegyada kale sida Baaritaanka Cudurrada (Pathology) iyo Raajada (Radiology) waa tusaalayaal ah adeegyada aan u qalmin FAP.

Bukaanada U qalma – Bukaanka hela adeegyada u qalmitaanka, oo soo gudbiya xeerka Taageerada Maaliyadeed oo dhamaystiran (oo ay la socdaan dukumeentiyada/macluumaadka la xiriira), isla markaana lagu go'aamiyo inay u qalmaan Taageerada Maaliyadeed ee ay bixiyaan Shaqaalaha Taageerada Maaliyadeed ee Ridgeview.

Sida loo Codsado – Codsiyada Daryeelka Bulshada ayaa lagu heli karaa/lagu buuxin karaa/lagu diri karaa sida soo socota:

- Codsii kasoo qaado qaybta diiwaan gelinta ee Ridgeview.
- Codso in codsiga laguugu soo diro boostada, adigoo ka wacaya Shaqaalaha Taageerada Bukaanka ee Ridgeview lambarkan 952-442-8054.
- Codso foomka codsiga adoo ku codsanaya boostada/ama booqasho ahaan: codsiga boostada u dir Shaqaalaha Taageerada Maaliyadeed ee Ridgeview, 500 S Maple St, Waconia, MN 55387. Si toos ah u booqo, oo tag miiska soo dhaweynta ee Ridgeview.
- Kasoo degso codsiga webseytka Ridgeview:
<https://www.ridgeviewmedical.org/patients-visitors/financial/financial-assistance/>.

U dir codsiga aad buuxisay (oo wata dhammaan dukumeentiyada/macluumaadka lagu qeexay habraaca codsiga) shaqaalaha Taageerada Maaliyadeed ee Ridgeview, 500 S Maple St, Waconia, MN 55387.

Go'aaminta U qalmida Taageerada Maaliyadeed

Guud ahaan, dadka u qalma waxay heli karaan Taageerada Maaliyadeed iyagoo isticmaalaya nidaamka miisaanka ee hoos u dhacaya, marka Dakhliga Qoyska uu yahay ama ka hooseeyo 250% ee Xeerarka Saboolnimada ee Dawladda Federaalka (FPG). U qalmida Taageerada Maaliyadeed, waxaa loola jeedaa

In Shaqsiyaadka u Qalma ay heli doonaan qarashka qayb ahaan ama buuxa ee daryeelka, aana laga qaadi doonin lacag ka badan “Cadadka Caadiyan la Qaado persons (AGB, sida ay cadeysay IRS Qaybta 501(r)). Heerarka Taageerada Maaliyadeed ee ku saleysan keliya Dakhliga Qoyska iyo Xeerarka Saboolnimada Federaalka (FPG), waa:

- Dakhliga Qoyska oo ah 0 ilaa 200% heerka FPG - U qalma 100% oo qiimo Dhimis ah
- Dakhliga qoyska oo ah 201 ilaa 250% FPG - Taageerada Maaliyadeed ee Qayb ahaan - AGB inta ugu badan ee lagu dalaci karo bukaanka - Hadda qiimo dhimistaan waa 56%.

FARIIN MUHIIM AH: Shuruudaha kale ee ka baxsan FPG ayaa sidoo kale la tixgaliyaa (sida, helitaanka lacag caddaan ah ama hanti kale oo laga yaabo in loo badelo lacag caddaan ah, iyo dakhli dheeraad ah oo bishii la helo marka loo eego kharashyada qoyska ee billaha ah), oo keeni karta in laga reebo kuwa hore. Haddii uusan jirin dakhliga qoyska oo lasoo



sheegay, macluumaadka ayaa laga doonayaa inay muujiso sida kharashaadka maalinlaha ah loo daboolo. Shaqaalaha Taageerada Maaliyadeed ee Ridgeview ayaa dib u eegis ku sameeya codsiyada lasoo diro kuwaasoo dhimaystiran, kadibna go'aansha Taageerada Maaliyadeed si waafaqsan xeerka Taageerada Maaliyadeed ee Ridgeview. Codsiiyo kasta oo aan dhamaystirnayn ayaan la eegi doonin, laakiin codsadeyaasha ayaa la wargelin doonaa lana siin doonaa fursad ay ku soo gudbiyaan dukumeentiyada/macluumaadka laga doonaayo.

Si aad u hesho caawimaad, ama haddii aad su'aalo qabto, fadlan wac: Shaqaalaha Taageerada Maaliyadeed ee **Ridgeview ood ka wici karto 952.442.8054, Isniinta-Jimcaha – 8:00 AM to 4:30 PM**